WARGEYSKA XUBNAHA
Maahanmuuttajien Varautumis- ja Maanpuolustusyhdistys (MVM)ry

KANTAMA

#6
Sebtembar 2026



Bartamaha dheemanka waxaa ku jira

QOFKA

QORAALKA TIFAFTIRAHA

Qof kastaa weyn karaa, waana in uu qof kastaa u diyaar-garoobaa

HAWEENKA OO KA QAYB QAADANAYA

U diyaar-garowgu ma aha cabsi. Wuxuu dhaliyaa dareen ammaan

DHACDOOYIN

Marka hore annagaa wax baranna – dabadeedna aqoonta ayaan sii gudbinnaa

TUSMADA

Sebtembar 2026 | Nro 6

IHMISET
YHTEISKUNTA
TURVALLISUUS



YHDESSÄ
VAHVEMPI
SUOMI

SALAANTA AGAASIMAHA FULINTA 3
Adiga ayaa ku jira bartamaha amniga guud iyo dhammeystiran

QORAALKA TIFAFTIRAHA 4
Qof kastaa wuu diyaar-garoobi karaa, waana inuu diyaar-garoobaa

ARAGTIDA KHABIIRKA 5
Booliiska oo qayb ka ah amniga dhammaystiran ee Finland

DHACDOOYIN 6–7
Laga bilaabo qaataha xogta ilaa gudbiyaha xogta

HAWEENKA OO KA QAYB QAADANAYA 8
U-diyaargarowgu ma aha cabsi. Wuxuu keenaa dareen amni

TALOOYINKA DIYAAR-GAROWGA 9
Mugdigu wuu sii badanayaa – ma diyaar baad u tahay?

CODKA DHALLINYARADA 10
Ciidamadu waa qayb yar oo nolosha ka mid ah, laakiin muddadaas wax badan ayaa laga baran karaa

WARARKA HADDA JIRA 11
Maxay muhiim u tahay in la dhammaystiro adeegga milatariga, maxaase faa'iido ah oo uu leeyahay mustaqbalka nolosha rayidka ah iyo shaqada?

EREYBIXINTA AMNIGA 12

Bartamaha dheemanka waxaa ku jira qofka

Adiga ayaa ku jira bartamaha amniga guud iyo dhammeystiran

Bartamaha dheemanka waxaa ku jira qofka

Marka aan ka hadalno u-diyaargarowga, dad badan fikradda ugu horreysa ee maskaxdooda ku soo dhacda waa dagaal. Taasi waa wax la fahmi karo, gaar ahaan xilligan aynu ku nool nahay. Laakiin u-diyaargarowga iyo amniga dhammaystiran waxay ka dhigan yihiin wax aad uga badan taas.

Amniga dhammaystiran waxaa badanaa lagu sawiraa qaab dheeman ah. Aniga ahaan, waxa ugu muhiimsan waa in la eego bartamaha dheemanka.

Halkaas waxaa jooga qofka. Halkaas waxaad joogtaa adiga, aniguna halkaas ayaan joogaa.

Qof kasta oo naga mid ahi uma baahna inuu noqdo xirfadle amni. Doorkeenna wuxuu ka bilaaban karaa waxyaabo aad u fudud: waxaan garanayaa sida aan u dhaqmo marka korontadu go'do. Waxaan awoodaa inaan daryeelo naftayda iyo dadka ii dhow. Waxaan garanayaa halka aan ka heli karo macluumaad lagu kalsoonaan karo. Waxaan awoodaa inaan si deggan u dhaqmo marka ay dhacdo xaalad carqalad ah. Haddii awooddayda iyo xirfaddaydu ii saamaxaanna, waxaa laga yaabaa inaan sidoo kale caawiyo qof kale.

Arrintani muhiimad weyn ayay leedahay. Inta badan ee naga mid ahi awoodaan inay daryeelaan naftooda iyo dadka u dhow, ayay masuuliyiinta iyo mutadawiciintu heli karaan khayraad badan oo ay ku caawiyaan dadka gargaarka ugu badan u baahan.

Sidaas darteed waxaan doonayaa inaan qof kasta oo naga mid ah ku dhiirrigeliyo inuu hadda helo kaalintiisa gaarka ah ee amniga dhammaystiran ee Finland – ee aan la sugin ilaa ay wax dhacaan.

Gaar ahaan annaga dadka leh asal muhaajirnimo waxaan arrintan ku leenahay door muhiim ah. Aqoontayada luqadeed way kala duwanaan kartaa, asalkeenna way kala duwanaan karaan, xirfadaheenna iyo aqoonteenuna way kala duwanaan karaan. Laakiin amniga dhammaystiran ma weydiiyo halka uu qofku ku dhashay. Waxa uu weydiinayaa waxa aan awoodno, sida aan u dhaqanno iyo haddii aan marka loo baahdo awoodno inaan is daryeelno.

Qiimeynta khataraha qaranka ee Finland waxaa lagu aqoonsaday 21 nooc oo khatar ah iyo xaalado carqaladeyn kara bulshada oo muhiimad qaran leh. Adeegsiga awoodda militari waa mid keliya oo ka mid ah. Bulshadeennu waxay sidoo kale isu diyaarisaa, tusaale ahaan, ciladaha korontada iyo isgaarsiinta, shilalka halista ah, dhacdooyinka dabiiciga ah, cudurrada faafa iyo xaalado kale oo badan oo carqaladeyn kara nolol maalmeedkeenna caadiga ah.

Marka arrintan si qoto dheer loo barto, waxaa isla markaas la fahmaa arrin aad muhiim ugu ah Finland: nolol maalmeed ammaan ah iskeed uma samaysanto.

Waxaa ka dambeeya shaqo aad u badan oo ay maalin kasta qabtaan dowladda, masuuliyiinta, degmooyinka, shirkadaha, ururrada iyo dhinacyo kale oo badan. Shaqadan inteeda badan nolol maalmeedkeenna kama muuqato – waxaana laga yaabaa in taas lafteedu ay muujinayso sida wanaagsan ee nidaamku u shaqeeyo. Waxaan subaxdii soo kacnaa, korontadu way shaqaysaa, biyuhu qasabadda ayay ka yimaadaan, isgaarsiintu way shaqaysaa, marka loo baahdana caawimaad waa la heli karaa, adeegyada muhiimka ah ee bulshaduna way sii socdaan.



Shaho Jaff
Agaasimaha Fulinta
MVM ry

U-diyaargarowgu ma aha cabsi laga qabo mustaqbalka. Waa aqoon, xirfad, masuuliyad iyo awood waxqabad

nolol maalmeed ammaan ah iskeed uma samaysanto

Bulshadu waxay dhisi kartaa nidaamyo, masuuliyiintu way isu diyaarin karaan, ururraduna tababbarro way bixin karaan, laakiin bulsho ammaan ahi waxay sidoo kale u baahan tahay dad leh awood ay wax ku qabtaan.

Amniga Finland kuma dhisna shaqada masuuliyiinta oo keliya. Wuxuu ku dhisan yahay dhammaanteen.

Bartamaha dheemanka waxaa jooga qofka.

Mid kasta oo naga mid ahna wuxuu ka dhigi karaa dheemankaas mid ka sii xoog badan

Qof kastaa wuu diyaar-garoobi karaa, waana inuu diyaar-garoobaa

Xaaladda amniga Finland iyo dareenka ammaan ee dadku qabaan ayaa isbeddelay afartii sano iyo bar ee la soo dhaafay. Difaaca qaranku wuxuu helay iskaashi cusub iyo kheyraad dheeraad ah, labadaba dhinaca agabka iyo dhaqaalaha. Sida ay cilmi-baarisyadu muujinayaan, dadku sidoo kale waxay taageerayaan xoojinta difaaca qaranka.

Horumarkani wuxuu sidoo kale saameyn ku yeeshay shaqada hay'adaha kale ee amniga iyo horumarinta u-diyaargarowga. Hay'aduhu waxay fahmeen muhiimadda iskaashiga, labadaba qorshaynta iyo tababarrada wax-ku-oolka ah. Hawl si wanaagsan loo qorsheeyay waxay fududaynaysaa sidii looga gudbi lahaa xaaladaha dhabta ah.

U-diyaargarowgu waa iskaashi

Finland waxaa bishii Janaayo lagu daabacay Istaraatiijiyadda Amniga Bulshada 2025, taas oo ah go'aan mabda' ah oo Golaha Dowladda ah. Ujeeddada istaraatiijiyaddu waa in qof kasta, iyadoo laga duulayo xaaladdiisa gaarka ah, loo helo hannaan guud oo lagu hirgelinayo amniga dhammaystiran.

Istaraatiijiyadda amniga waxay qeexaysaa habka amniga dhammaystiran, kaas oo hawlaha muhiimka u ah bulshada lagu ilaaliyo iskaashiga u dhexeeya hay'adaha dowladda, ganacsiyada, ururrada iyo muwaadiniinta. Amniga dhammaystiran wuxuu saldhig u yahay adkaysiga bulshada Finland ee xaaladaha qalalaasaha.

Dhammaan qaybaha bulshada ayaa si wadajir ah uga qaybqaata ilaalinta hawlaha muhiimka ah. Dabacsanaanta iyo joogtaynta iskaashiga u dhexeeya qaybaha kala duwan ee bulshada iyo heerarka kala duwan ee hawlaha ayaa ka mid ah shuruudaha aasaasiga ah ee lagu xoojinayo adkaysiga xaaladaha qalalaasaha.

Shakhsiyaadku waa qaybaha muhiimka ah ee amniga dhammaystiran

Bulshadu waxay samaysaa tababbarro waxayna raadisaa meelaha hawlaha ka mid ah ee daciifka ah ama u baahan horumar.

U-diyaargarowga waxaa lagu horumariyaa mashaariic kala duwan, sida mashruucii talo-bixinta u-diyaargarowga 72 saacadood ee ay hay'adaha dowladda iyo ururradu sameeyeen dhowr sano ka hor, kaas oo loogu talagalay qoysaska. Mashruuca waxaa lagu qaybiyay tilmaamo faahfaahsan oo ku saabsan u-diyaargarowga, kuwaas oo lagu soo bandhigay buug-yare

Waxaa lagu tababaran karaa ilaalinta dadweynaha

Ma ogtihiin in Finland ay ka mid tahay waddamada hormuudka ka ah Yurub dhinaca ilaalinta dadweynaha? Finland waxaa ku yaalla 50 500 hoy oo loogu talagalay ilaalinta dadweynaha, kuwaas oo leh 4,8 milyan oo meelood oo loogu talagalay dadka.

Magaalada Kuopio waxaa 2–3 Sebtembar lagu qabtay tababbarka ilaalinta dadweynaha ee Suojaan 2026. Tababbarka waxaa lagu tijaabiyay sida loo ilaalin karo tiro badan oo dad ah xaalado kala duwan oo carqalad ah iyo xaalado aan caadi ahayn. Waxaa ka qaybgalay 2 000 qof. Ujeeddadu waxay ahayd in la horumariyo iskaashiga u dhexeeya hay'adaha dowladda iyo dhinacyada gobolka, iyo sidoo kale in la xoojiyo hoggaaminta, fahamka xaaladda iyo isgaarsiinta marka hawlaha caadiga ah ee bulshada ay carqalad galaan.

Ma ognahay waxa uu yahay hoyga ilaalinta dadweynaha, sida loo calaamadeeyo ama sida loogu dhaqmo gudaha hoyga? Helitaanka macluumaadkan wuxuu u baahan yahay dadaal iyo in laga raadiyo ilo kala duwan. Halkaas ayay mar kale muhiimad weyn ku yeelanayaan mutadawiciinta ka shaqeeya ururrada.

Xirmada macluumaadka wax-ku-oolka ah ee uu soo ururiyay Ururka U-diyaargarowga iyo Difaaca Dalka ee Muhaajiriinta (MVM ry) waa meel wanaagsan oo laga bilaabo. Waxaa laga heli karaa bogga internetka ee ururka.



Booliiska oo qayb ka ah amniga dhammaystiran ee Finland



Sami Kalliomaa
Kormeeraha Sare ee Booliska

Hawsha ugu weyn ee booliiska Finland waa ilaalinta dadka iyo bulshada. Booliisku wuxuu ka hortagaa oo baaraa dambiyada, wuxuuna mas'uul ka yahay ilaalinta nidaamka guud iyo amniga iyo sidoo kale sugidda nidaamka bulshada

Hawlaha booliiska waxaa sidoo kale ka mid ah arrimaha oggolaanshaha ee sharcigu dhigayo, sida bixinta baasaboorrada iyo kaararka aqoonsiga. Booliisku wuxuu caawiyaa marka ay dhacaan shilal, xaalado rabshado ah iyo carqalado kale. Xaaladaha degdegga ah, booliiska waxaa lagala xiriiri karaa lambarka guud ee xaaladaha degdegga ah 112

Hawlaha booliiska Finland waxay ku salaysan yihiin sharciga

Booliisku wuxuu dadka ula dhaqmaa si siman, isagoo ixtiraamaya xuquuqda aasaasiga ah iyo xuquuqda aadanaha ee qof kasta. Adeegyada booliisku waxay u furan yihiin qof kasta, iyadoo aan loo eegin, tusaale ahaan, asal, dhalasho, luqad ama diin. Qofka dhibbane u noqda dambi wuxuu arrinta u sheegi karaa booliiska. Haddii loo baahdo, qofku wuxuu codsan karaa turjubaan marka uu booliiska la macaamilayo.

Shaqada booliisku waxay nolol maalmeedka si weyn uga muuqataa sidoo kale dhinaca ka hortagga. Booliisku wuxuu la kulmaa dhalinyarada, wuxuu booqdaa iskuullada, wuxuu talo siiyaa bulshooyinka, wuxuuna la socdaa ifafaalaha wiiqi kara amniga. Ujeeddadu waa in dhibaatooyinka laga hortago ka hor inta aysan isu beddelin dambiyo ama carqalado halis ah

Booliisku waa qayb muhiim ah oo ka mid ah amniga dhammaystiran ee Finland

Amniga dhammaystiran waxaa loola jeedaa in hay'adaha dowladda, degmooyinka, shirkadaha, ururrada iyo dadku ay si wadajir ah uga shaqeeyaan sidii bulshadu ammaan u ahaan lahayd sidoo kale marka ay dhacaan xaalado qalalaase ama carqalado kala duwan. Habka Finland ee amniga dhammaystiran waa qayb muhiim ah oo ka mid ah u-diyaargarowga, waxaana habkan lagu qeexay hawlaha muhiimka u ah bulshada ee ay tahay in la awoodo in la ilaaliyo xaalad kasta.

Mid ka mid ah hawlahaas waa amniga gudaha, waxaana booliisku ka qaadaa mas'uuliyad ballaaran. Xaaladaha kala duwan ee carqaladayn kara bulshada, iyadoo aan loo eegin sida ay ku bilowdeen, badanaa waxay sidoo kale hawlaha booliiska uga muuqdaan carqalado ku yimaadda nidaamka guud iyo amniga.

Dadka deegaanka sidoo kale waxay door muhiim ah ku leeyihiin xaqiijinta amniga dhammaystiran. Qof kasta wuxuu gacan ka geysan karaa amniga isagoo u hoggaansamaya shuruucda iyo tilmaamaha hay'adaha dowladda, caawinaya dadka kale, isla markaana hay'adaha u soo sheegaya dambiyada iyo xaaladaha khatarta ah.

Waxaa sidoo kale muhiim ah in si taxaddar leh loola dhaqmo macluumaadka ku faafaya internetka, isla markaana fariimaha hay'adaha dowladda laga hubiyo kanaalladooda rasmiga ah. Macluumaad khaldan lama faafin karo, sababtoo ah wuxuu kordhin karaa cabsida wuxuuna adkayn karaa shaqada hay'adaha dowladda.

Booliiska waa lagu kalsoonaan karaa

Kalsoonida ka dhexaysa booliiska iyo dadka deegaanka waxay taageertaa amniga bulshada oo dhan. Booliiska waa lala xiriiri karaa, talo waa laga weydiin karaa, waxaana laga codsan karaa caawimaad. Finland ammaan ah waxay ku dhisantahay iskaashi iyo in qof kasta uu dareemo inuu qayb ka yahay bulshada.
Mid kasta oo naga mid ah wuxuu maalin kasta ku xoojin karaa amniga bulshada ficilladiisa iyo doorashooyinkiisa.

WAXBARASHO, XIRFADO, BULSHO, FINLAND OO AMMAAN BADAN

ŁAGA BILAABO QAATAHA XOGTA ILAA GUDBIYAHA XOGTA

Bisha Sebtembar waxay MVM ry u ahayd bil si gaar ah u firfircoon. Isla waqtigaas waxaan ahayn kuwa qaata xogta iyo kuwa gudbiya: kooxdayada tababarayaasha waxay ka qaybqaadatay tababbarro dhowr ah oo ku saabsan amniga iyo u-diyaargarowga, isla markaana waxaan xogta u sii gudbinaynay dadka kale kulamadeenna wacyigelinta

Fikradda ayaa ah mid fudud. Si aan dadka kale ugu gudbin karno xog amni oo lagu kalsoonaan karo, waa inaan marka hore annagu wax barannaa, ku tababbarannaa oo horumarinnaa aqoonteenna iyo xirfadaheenna. Bishii Sebtembar waxaan arrintan ka qaadnay tallaabooyin badan oo muhiim ah

Awoodda lagu shaqeeyo tababarayaal ahaan

Xubnaha kooxda tababarayaasha ee MVM ry waxay dhammaystireen tababarka tababarayaasha ee K1 ee MPK. Tababarkani wuxuu siinayaa awood laga sii shaqeeyo shaqooyinka tababaranimo ee MPK wuxueena aasaas u yahay inaan ammaan ka sii qaadanno mustaqbalka si firfircoon oo muhiim ah fulinta tababarada.

Isla waqtigaas, aqoonteenna waxaa lagu xoojiyay dhinacyo kala duwan oo amniga ah

Qaar ka mid ah kooxdayada waxay ka qaybqaateen koorsada MPK ee Amniga Nolol Maalmeedka, taas oo lagu qabtay iskaashi lala yeeshay Maanpuolustusnaisten Liitto.

Koorsada waxaa lagu bartay sida loo aqoonsado khataraha amni ee ka jiri kara guriga iyo deegaanka ku dhow iyo sida loogu diyaar-garoobi karo si wax-ku-ool ah. Mawduucyada waxaa ka mid ahaa wacista gargaarka, daminta dabka bilowga ah, gargaarka degdegga ah, kaydka guriga, aasaaska amniga internetka iyo u-diyaargarowga xaaladaha kala duwan ee carqaladayn kara nolol maalmeedka.

Arrintu kuma koobnayn oo keliya casharro iyo muxaadarooyin, balse xirfadaha waxaa sidoo kale lagu tababbaray si ficil ahaan ah. Tababarka wax-ku-oolka ahi wuxuu waxyaabo badan ka dhigaa kuwo la taaban karo: xogtu waxay isu beddeshaa xirfad marka qofku fursad u helo inuu isagu isticmaalo.

Amnigu sidoo kale waa awoodda maskaxeed ee waxqabadka

Qaar ka mid ah kooxda tababarayaasha waxay sidoo kale dhammaysteen tababar laba maalmood ah oo ku saabsan adkaysiga maskaxeed ee xaaladaha qalalaasaha. Tababarkan waxaa lagu qabtay iskaashi lala yeeshay Turvakurssin Kilta ry, Naisten Valmiusliitto – Uudenmaan alueneuvottelukunta iyo Maktabadda Järvenpää.

Tababarka waxaa lagu bartay xaalado qalalaase oo kala duwan, gargaarka degdegga ah ee dhinaca maskaxda iyo sida mutadawac caawinaya uu ula kulmi karo una taageeri karo qof ku jira xaalad adag.

Marka laga hadlayo u-diyaargarowga, si fudud ayaa maskaxda loogu hayaa kaydka guriga, koronto-go'a ama hoyga badbaadada dadweynaha. Hase yeeshee, marka ay dhacdo xaalad qalalaase ah, waxaa sidoo kale loo baahan yahay awoodda lagu wajaho qofka, lagu aqoonsado baahida uu u qabo taageero iyo in qofku ilaashado awooddiisa waxqabad.

Sidaas darteed, adkaysiga maskaxeed ee xaaladaha qalalaasaha waa qayb muhiim ah oo ka mid ah amniga dhammaystiran

Aqoonta ilaalinta dadweynaha waxay u horumaraysaa tallaabo tallaabo

Sido kale tababarka ilaalinta dadweynaha waxaan ka qaadnay tallaabooyin cusub.

Kooxdeenna waxaa usoo kordhay tababaraha ugu horreeya ee ilaalinta dadweynaha (VSS-kouluttaja), Shaho Jaff, xubin kale ayaa u gudubtay in ay u shaqeyso sida tababara-caawiye VSS ah, qayb ka mid ahna waxay dhammaystireen tababarkoodii ugu horreeyay ee sare ee ilaalinta dadweynaha. Ujeedadeennu waa in inta ugu badan ee suurtogal ah ee xubnaha kooxdeenna ay u usoo gudbaan jidka tababaranimo iyada oo loo eegayo jadwalkooda gaarka ah.

Marka hore annagaa wax baranna
Kadib waan ku tababbarannaa
Aqoontana waxaan sii gudbinnaa

AQOONTA LA BARTAY WAA LA SII GUDBIYAA

Bishii Sebtembar ma ahayn oo keliya inaan annagu wax baranno

3. Sebtembar — Kulan xog-wadaag ah oo ka dhacay Espoo, looguna talagalay dadka ku hadla afka Carabiga







waxaan Espoo ku qabanay kulan wacyigelin ah oo loogu talagalay dadka ku hadla afka Carabiga. Kulanka waxaa looga hadlay, iyo kuwo kale, amniga dhammaystiran, kulamada qorista ciidanka, adeegga ciidanka, fursadaha kala duwan ee adeegga iyo siyaabaha kala duwan ee looga qaybqaadan karo dhismaha amniga bulshada Finland.

Aragtida amniga dhammaystiran waxay kulanka ku lahayd muhiimad gaar ah. Finland amnigeeda ma dhisaan oo keliya Ciidamada Difaaca ama hay'adaha kale ee dowladda. Waxaa sidoo kale qayb ka ah shirkadaha, ururrada, bulshooyinka iyo dadka caadiga ah. Qof kasta wuxuu heli karaa hab u gaar ah oo uu uga qaybqaato, iyadoo laga duulayo xaaladdiisa gaarka ah.

6. Sebtembar — Kulan loogu talagalay dhallinyarada ku hadasha afka Ruushka






waxaan sidoo kale qabanay kulan loogu talagalay dhalinyarada ku hadasha afka Ruushka. Doodda waxaa si gaar ah looga hadlay kulamada qorista ciidanka, adeegga ciidanka, iskaa wax u qabso iyo fursadaha ay dhalinyaradu u leeyihiin inay helaan kaalintooda dhinaca difaaca qaranka iyo amniga.

Labada kulanba waxaa muhiim ahaa fursadda ay dadku su'aalo ku weydiin karaan. Nidaamka amniga iyo difaaca qaranka Finland wuxuu u muuqan karaa mid adag qof aan hore ugu baran. Fursadda lagu wada hadlo arrimahaas iyadoo lagu adeegsanayo luqad qofku fahmi karo waxay hoos u dhigtaa caqabadda hortaagan raadinta xogta iyo ka qaybqaadashada.

Koorsada Amniga Nolol Maalmeedka (MPK)



Tababarka K1 (MPK)



Tababarka ilaalinta dadweynaha





VSS

Xogta amniga sidoo kale waxaa laga heli karaa internetka

Qof kasta ma awoodo inuu ka qaybgalo tababbarro ama kulamo wacyigelin ah. Sidaas darteed, waxaan bilownay inaan boggayaga internetka ku ururinno macluumaad ku saabsan amniga, u-diyaargarowga iyo ilaalinta dadweynaha, si qofku ugu soo laaban karo marka uu u baahdo.

Waxaan marka hore daabacnay tilmaamaha ku saabsan hoyga badbaadada dadweynaha oo lagu diyaariyay luqado kala duwan. Ujeeddadeennu waa inaan sii wadno dhismaha xogtan oo aan bogga si tartiib ah ugu kordhinno macluumaad kale oo wax-ku-ool ah oo ku saabsan amniga iyo u-diyaargarowga.

Isgaarsiinta amniga ee luqadaha badan annaga nagama aha oo keliya in erayo laga turjumo luqad una gudbaan luqad kale. Hadafku waa in qofku sidoo kale fahmo macluumaadka oo uu ogaado sida uu ugu dabaqi karo noloshiisa.

Marka xigta Tampere

Gudbinta xogtu waxay sii socon doontaa bisha Oktoobar. Sabtida 24-ka Oktoobar, saacadda 10:00–14:00, waxaan joogi doonnaa hoyga badbaadada dadweynaha ee Liisankallio ee Tampere, meel u dhow Kaniisadda Kaleva, cinwaankuna waa Liisankatu 2.

Inta lagu jiro maalintaas, dadweynuhu waxay fursad u heli doonaan inay bartaan hoyga badbaadada dadweynaha, isla markaana ay helaan macluumaad ku saabsan ilaalinta dadweynaha iyo u-diyaargarowga 72 saacadood.

Haddii aad joogto Tampere ama meelaha ku dhow, nagu soo booqo, baro hoyga badbaadada dadweynaha oo wax cusub ka baro u-diyaargarowga. Isla markaana waxaad na weydiin kartaa arrimo laga yaabo inay hore kuugu caddayn waayeen.

Bishii Sebtembar waxay si wanaagsan u muujisay waxa ay noo tahay inaan ka gudubno qaataha xogta una gudubno gudbiyaha xogta

Marka hore annaga ayaa wax baranna. Kadib waan ku tababbarannaa. Marka aqoonteenna iyo xirfadaheenna ay xoogaystaan, waxaan u sii gudbinnaa dadka cusub, bulshooyinka cusub iyo si tartiib tartiib ah luqado cusub

U-diyaargarowgu ma aha cabsi. Wuxuu keenaa dareen amni



Aqoonta iyo xirfadaha amnigu waxay faa'iido u leeyihiin qofka shaqadiisa iyo nolol maalmeedkiisaba. Xubin ka tirsan MVM ry oo ka shaqaysa waxbarashada carruurnimada hore, qorshaynta hore, maaraynta khataraha iyo awoodda lagu dhaqmo xaaladaha kala duwan waxay qayb ka yihiin shaqadeeda maalinlaha ah. Qoraalkan waxay kaga hadlaysaa sababta ay ugu biirtay hawlaha MVM ry iyo sababta u-diyaargarowgu iyada ugu keeno, ka hor wax kasta, dareen amni.

Natalia Pienimaa

Waxaan ahay muwaadin Finland ah oo leh asal muhaajirnimo. Waxaan Finland ku noolaa in ka badan 30 sano, taas oo ah inta badan noloshayda. Finland waa gurigayga. Halkan ayay joogaan qoyskayga, carruurtayda iyo carruurta carruurtayda, waxaana si xooggan u dareemayaa inaan qayb ka ahay bulshadan.

Waxaan doonayaa inaan noqdo xubin firfircoon oo bulshada ka mid ah, oo aan kaalintayda ka qaato sidii Finland ay u noqon lahayd meel ka sii ammaan badan oo leh isku duubni bulsho oo xooggan, annaga oo dhan.

Xirfad ahaan waxaan ahay sosionomi ku takhasusay waxbarashada carruurnimada hore, waxaanan ka shaqeeyaa xannaano carruur. Shaqadayda, amniga, tixgelinta dadka kale iyo daryeelka dadka kale waa qayb muhiim ah oo ka mid ah aqoonsigayga xirfadeed. Waxbarashada carruurnimada hore, deegaan ammaan ah, qorshaynta hore iyo awoodda lagu dhaqmo xaaladaha kala duwan waa qayb ka mid ah shaqada maalinlaha ah. Waxaan doonayaa inaan kaalintayda ka qaato xoojinta dareenka amni ee carruurta, qoysaska iyo kooxda shaqada.

Xaaladda aan degganayn ee dunida maanta waxay sii xoojisay rabitaankayga ah inaan wax badan ka barto amniga, u-diyaargarowga iyo adkaysiga bulshada ee xaaladaha qalalaasaha. Waxaan doonayaa inaan si wanaagsan u fahmo waxa aan anigu samayn karo iyo sida aan ugu dhaqmi karo xaaladaha kala duwan ee carqaladaha iyo qalalaasaha.

MVM ry waxaan uga helayaa fursad aan ku horumariyo aqoon iyo xirfado waxtar u leh shaqadayda iyo nolol maalmeedkayga. Aniga ahaan, u-diyaargarowgu macnaheedu ma aha cabsi. Taas beddelkeeda, aqoonta, qorshaynta hore iyo diyaar-garowgu waxay keenaan dareen amni. Marka qofku ogaado sida loogu dhaqmo xaaladaha kala duwan, wuxuu xaaladahaas u wajihi karaa si deggan oo qorshaysan.

Waxaan xubin ka noqday Maahanmuuttajien Varautumis- ja Maanpuolustusyhdistys ry (MVM ry) iyo kooxda tababarayaasha, sababtoo ah waxaan doonayaa inaan wax barto, ka qaybqaato oo aan waxtar yeesho. Waxaan sidoo kale muhiim u arkaa in dadka leh asal muhaajirnimo ay si firfircoon uga qaybqaataan dhismaha amniga iyo isku duubnida bulshada Finland.

Waxaan sidoo kale ku dhiirrigelinayaa dadka kale inay nagu soo biiraan. Ururka waxaad ka heli kartaa xog cusub oo ku saabsan hawlaha, tababarrada iyo wada-hawlgalayaasha. Isla markaana waxaad baran kartaa waxyaabo cusub, waxaad la kulmi kartaa dad cusub, waxaadna heli kartaa habab adiga kugu habboon oo aad uga qaybqaadan karto.

Waxaan aaminsanahay in qof kasta oo naga mid ah uu wax ka qaban karo amniga aan wadaagno. Marka aan xoojinno aqoonteenna iyo xirfadaheenna oo aan is caawinno, waxaan isla markaas dhiseynaa bulsho ka sii ammaan badan

MUGDIGU WUU SII BADANAYAA – MA DIYAAR BAAD U TAHAY?

Marka dayrtu timaaddo, maalmaha way soo gaabtaan, waqtiga mugdiguna wuu sii dheeraadaa. Mugdigu wuxuu saameeyaa amniga nolol maalmeedka, guriga gudihiisa iyo bannaankaba. Xitaa koronto-go' caadi ah wuxuu dareen ahaan aad uga duwanaan karaa haddii uu dhaco fiid ama habeen mugdi ah. Sidaas darteed, hadda waa waqti wanaagsan in la hubiyo dhowr arrimood oo yaryar laakiin muhiim ah

Hubi in bannaanka lagaa arki karo



Milicsaduhu wuxuu ka caawiyaa darawalka inuu qofka lugaynaya si aad uga horreysa u arko. Talooyinka hadda jira waa in la isticmaalo ugu yaraan laba milicsade, si lagaa arki karo jihooyin kala duwan. Milicsadaha la sudho waxaa habboon in lagu xiro qiyaastii heerka jilibka si uu si xor ah u dhaqaaqi karo. Waxaa si gaar ah muhiim u ah in milicsaduhu ka muuqdo dhinaca waddada. Milicsadayaasha waxaa sidoo kale lagu xiran karaa labada gacmood ama labada lugood qaybtooda hoose

Xusuusnow inaad muuqato marka aad baaskiil waddo



Xilliga mugdiga, baaskiilku waa inuu hore ku leeyahay nal cad ama huruud khafiif ah, gadaashana nal cas. Sidoo kale hubi milicsadayaasha baaskiilka. Xitaa haddii aad ku waddo waddo iftiin leh, ha u qaadan in darawalku si toos ah kuu arki doono – mugdiga, roobka iyo nalalka baabuurta kaa soo horjeeda waxay adkayn karaan aragga

Xayawaanka gurigana waa inuu muuqdaa



Markaad eyga dibadda ula baxdo xilliga mugdiga, waxaa wanaagsan in eygu yeesho milicsade, suun ama qoore milicsada, ama nal yar. Sidaas ayay darawallada, dadka baaskiillada wata iyo dadka kale ee socda u arki karaan adiga iyo eyga waqti ku filan. Gaar ahaan eyga midabkiisu madow yahay wuxuu mugdiga ku noqon karaa mid ku dhowaad aan la arki karin

Ma taqaannaa meesha aad ka heli karto tooshka?



Tooshka gacanta ama kan madaxa lagu xirto waxaa habboon in lagu kaydiyo meel si fudud looga heli karo xitaa marka ay gebi ahaanba mugdi tahay. Isla markaana hubi baytariyada oo batariga kaydka ah (power bank) ku hay mid dallacan

Shumacyada si gaar ah uga taxaddar



Xilliga dayrta, shumacyada waxaa badanaa loo isticmaalaa jawi abuurid iyo iftiin labadaba. Shumac shidan marna lama dayn karo iyadoo aan cidina ilaalin. Shumaca dhig meel adag oo aan guban karin, kana fog daahyada, qurxinta, waraaqaha iyo waxyaabaha kale ee si fudud dab u qabsan kara. Sidoo kale tixgeli carruurta iyo xayawaanka guriga. Mar kasta dami shumacyada marka aad qolka ka baxayso ama aad seexanayso



Koronto-go' ayaa dhici kara wakhti kasta, laakiin xilliga mugdiga ah u-diyaargarowga wanaagsan ee hore wuxuu si weyn u fududeeyaa xaaladda.



Hubin yar oo aad maanta samayso waxay ka dhigi kartaa fiid mugdi ah mid aad uga ammaan badan

CIIDAMADU WAA QAYB YAR OO NOLOSHA KA MID AH, LAAKIIN MUDDADAAS WAX BADAN AYAA LAGA BARAN KARAA

Qoraalkii hore waxaan qaybta Haweenku way ka qaybqaataan kula kulannay Najma. Hadda waxaa hadlaya walaalkeed Mohamud Ali Abdi, oo hadda adeeggiisa milatari ku gudanaya Vekaranjärvi. Mohamud wuxuu ka warramayaa waxa adeeggu ilaa hadda u soo kordhiyay, sida uu u soo arkay sinnaanta ciidanka dhexdiisa iyo waxa uu jeclaan lahaa inuu u sheego dhallinyarada isu diyaarinaysa adeegga milatari

Halkee ayaad hadda ka gudanaysaa adeegga milatari?

Waxaan joogaa Vekaranjärvi, waxaana u adeegaa askari madaafiic ah (tykkimies). Waxaan adeegga bilaabay bishii Luulyo, muddada adeeggayguna waa lix bilood

Maxay ciidamadu kuu soo kordhiyeen?

Ciidamadu waxay i bareen mas'uuliyad, is-edbin iyo nidaam. Waxaan helay waayo-aragnimo cusub, waxaana fursad u helay inaan naftayda ku tijaabiyo siyaabo aanan hore u ogeyn inaan awoodo. Adeeggu wuxuu sidoo kale iga saaray aagga raaxadayda.

Sidee ayaad u soo aragtay sinnaanta ciidanka dhexdiisa?

Si wanaagsan. Ma aanan la kulmin takoor ama loola dhaqmid aan sinnayn. Dhammaanteen si isku mid ah ayaa naloola dhaqmaa, anigana si ka duwan dadka kale layguma dhaqmin asalkayga awgiis

Mohamud Ali Abdi



Adigu ma aadan codsan tababarka hoggaaminta. Hadda maxaad arrintaas ka qabtaa?

Aniga ayaa doortay adeegga lixda bilood ah, sababtoo ah waxaan leeyahay qorshayaal kale. Waqtigaas laga yaabee inaanan ka fikirin inta uu tababarka hoggaamintu qofka siin karo.
Tusaale ahaan, waxaan arkay alikersant asal ahaan Soomaali ah, oo ah qof aad u nidaamsan oo ku dayasho mudan. Marka aad aragto, waxaad fahmaysaa in tababarka hoggaamintu runtii qofka wax badan horumarin karo. Haddii qorshayaashaada gaarka ahi kuu saamaxayaan, waxaan kugula talin lahaa inaad codsato. Waxaad ka heli kartaa aqoon iyo xirfado badan oo waxtar kuu yeelan kara mustaqbalka.

Maxaad ku odhan lahayd qof dhallinyaro ah oo u socda kulanka qorista ciidanka ama bilaabaya adeegga?

Halkaas taga adigoo niyad wanaagsan iyo dhiirrigelin leh. Ciidamadu waa qayb yar oo nolosha ka mid ah, laakiin muddadaas wax badan ayaa laga baran karaa. Waxaad fursad u helaysaa inaad isku daydo waxyaabo cusub, naftaada tijaabiso oo aad naftaada ka ogaato dhinacyo cusub

Maxaa ugu wanaagsanaa adeegga?

Waxa ugu wanaagsan waa saaxiibbada cusub iyo dadka aad la kulanto. Ciidanka waxaad sidoo kale la kulmi kartaa waxyaabo aan lagu samayn karin nolosha caadiga ah ee rayidka. Waxaan fursad u helay inaan ku tababarto isticmaalka hubka, waxaana dhowaan sidoo kale ku tababaran doonnaa madaafiicda. Waxaa xiiso leh in la barto sida loogu dhaqmo xaalado kala duwan

Ka warran haddii maalin uun loo baahdo in Finland la difaaco?

Finland waxay i siisay fursado badan, sida fursadda aan wax ku barto oo aan noloshayda halkan ka dhisto. Haddii loo baahdo in Finland la difaaco, waan difaaci lahaa.
Ciidanka waxaa la i baraa sida loo sameeyo, anigoo ah askari madaafiic ahna waxaan sidoo kale baranayaa hawshayda gaarka ah. Aniga ahaan, difaaca Finland wuxuu noqon lahaa waajib.

Amnigu wuxuu mideeyaa walaalaha

Walaashii Mohamud, Najma, waxaa lagu soo bandhigay cadadkii hore ee Kantama qaybta Haweenku way ka qaybqaataan. Mohamud wuxuu sheegay inuu ku faanayo walaashiis iyo tababarka ay ku qaadanayso hawlaha MVM ry.

Sheekada walaalahan waxay sidoo kale ina xusuusinaysaa muhiimadda dadka nagu dhow. Tusaalaha qoyska iyo hab-fikirkiisu waxay saameyn ku yeelan karaan sida qofka dhallinyarada ahi u arko booskiisa bulshada Finland iyo inuu qayb ka yahay amniga aan wadaagno.

MAXAY MUHIIM U TAHAY IN LA DHAMMAYSTIRO ADEEGGA MILATARIGA, MAXAASE FAA'IIDO AH OO UU LEEYAHAY MUSTAQBALKA NOLOSHA RAYIDKA AH IYO SHAQADA?

Faa'iidooyinka adeegga milatariga waxaa inta badan laga hadlaa sidoo kale waayo-aragnimada dhallinyarada laftooda. Wareysiyada waxaa si joogto ah uga soo baxa arrimo ay ka mid yihiin kalsoonida nafta, qaadashada mas'uuliyadda, saaxiibtinimooyin cusub, xirfadaha shaqada kooxeed iyo muhiimadda tababarka hoggaaminta.

Laakiin maxay adeegga milatarigu si dhab ah qofka uga siin kartaa nolosha rayidka ah iyo nolosha shaqada mustaqbalka? Cadadkan, Jyri Vilamo, majur (kaydka) iyo guddoomiyaha Golaha Ururka Suomen Reserviupseeriliitto, ayaa arrintan si faahfaahsan uga sharxaya aragtida khabiirka

Adeegga milatariga oo si wanaagsan loo dhammaystiray wuxuu faa'iido u leeyahay siyaabo badan, inkastoo dhammaan faa'iidooyinkiisa aan laga yaabin in horay loo garan karo. Ciidamada Difaaca Finland waxay ka mid yihiin hay'adaha Finland loogu qaddarinta iyo kalsoonida badan yahay. Boqolkiiba 86 muwaadiniinta ayaa ku kalsoon Ciidamada Difaaca.
Adeegga milatarigu ragga Finnishka ah waa waajib muwaadinnimo oo sharcigu dhigayo, halka dumarka uu u yahay mid ikhtiyaari ah. Si kastaba ha ahaatee, muwaadin kasta oo Finland ah wuxuu leeyahay waajib difaaca dalka ah oo ku salaysan dastuurka. Xaaladaha qalalaasaha, dhammaanteen waa naloo baahan yahay, qof kastana wuxuu qaadi karaa mas'uuliyaddiisa ku aaddan amniga bulshada, iyadoo aan loo eegin inuu soo dhammaystay adeegga milatariga iyo in kale.

Adeegga rayidka ah (siviilipalvelus) waa doorasho kale oo barbar socota adeegga milatariga. Hawlo la xiriira u-diyaargarowga waxaa si mutadawacnimo ah looga qaban karaa qaybo badan oo kala duwan oo bulshada ka mid ah.
Hoos waxaa ku qoran qaar ka mid ah faa'iidooyinka uu adeegga milatarigu bixiyo. Malaayiin qof oo Finnish ah ayaa muddo tobannaan sano ah si shaqsi ah u soo maray faa'iidooyinkan.

Xirfadaha qofka

- **Awoodda u adkaysiga cadaadiska:** Awoodda u adkaysiga walbahaarka way kobcaysaa marka xaalado adag lagu xalliyo cadaadis iyo waqti xaddidan.
- **Maareynta waqtiga:** Awoodda lagu ilaaliyo jadwalka iyo habaynta hawlaha qofka u gaarka ah way soo hagaagtaa.
- **Adkaysiga iyo ku-dhegganaanshaha:** Shaqo joogto ah oo yool leh waxay qofka ka caawisaa inuu hawlaha dhammeeyo xitaa marka uu la kulmo dhibaatooyin

Shaqada kooxeed iyo xiriirrada

- **Xirfadaha wada-shaqaynta:** Inta lagu jiro adeegga waxaa la bartaa sida loola shaqeeyo dad kala duwan si loo gaaro yool wadajir ah.
- **Samaynta xiriirro:** Inta lagu jiro adeegga waxaa la bartaa dad ka kala yimid qaybaha kala duwan ee Finland, taas oo horseedi karta saaxiibtinimooyin muddo dheer socda iyo xiriirro qiimo leh oo sidoo kale waxtar u yeelan kara nolosha shaqada

Hoggaaminta iyo xirfadaha maamulaha

- **Xirfadaha maamulaha:** Tababarka hoggaaminta (AUK ama RUK) wuxuu baraa sida jawaab-celin loo bixiyo loona qaato, sida hawlaha loo qorsheeyo, dadka loo hoggaamiyo, waqtiga loo qorsheeyo iyo sida go'aanno looga gaaro xaalado adag.
- **Qaadashada mas'uuliyadda:** Mas'uuliyadda laga qaado hawlaha dadka kale waxay kobcisaa awoodda qofku ugu shaqayn karo hawlo adag iyo xilal hoggaamineed sidoo kale nolosha rayidka ah

Waxaa si gaar ah habboon in la codsado tababarka hoggaaminta. Ciidamada Difaaca Finland waa hay'adda ugu weyn Finland ee bixisa tababarka hoggaaminta, tababarka hoggaamineed ee ay bixisaanna si weyn ayaa looga qadariyaa sidoo kale nolosha shaqada. Maamulayaal iyo hoggaamiyeyaal badan oo maanta shaqeeya waxay soo dhammaysteen tababarka saraakiisha hoose (AUK) ama tababarka saraakiisha kaydka (RUK).

Mid ka mid ah awoodaha adeegga milatariga Finland waa in qof kastaa, mabda' ahaan, adeegga ka bilaabo meel isku mid ah. Jinsiga, asalka, midabka maqaarka ama sifo kale oo qofka u gaar ah ma go'aamiso sida laguu la dhaqmo. Waxaa habboon in qofku si firfircoon u muujiyo xiisaha uu u qabo hawlo kala duwan, laakiin go'aannada ugu dambeeya ee hawlaha waxaa lagu saleeyaa baahida Ciidamada Difaaca iyo qiimeynta ku habboonaanta qofka. Niyad wanaagsan iyo xaalad jireed oo wanaagsan waxay fududeeyaan gudashada adeegga waxayna qofka ka caawiyaan inuu ku guuleysto.

Sida cilmi-baarisyadu muujinayaan, adeegga milatarigu wuxuu sidoo kale taageeri karaa la-qabsiga bulshada Finland. Wuxuu xoojiyaa isku duubnida bulshada, wuxuu ka hortagaa go'doominta bulshada, wuxuuna qofka siinayaa fursad uu ku sameysto saaxiibtinimooyin socon kara nolosha oo dhan

Jyri Vilamo,
majur (kaydka)
Guddoomiyaha Golaha Ururka
Suomen Reserviupseeriliitto

EREYBIXINTA AMNIGA

AMNIGA DHAMMAYSTIRAN

KOKONAISTURVALLISUUS

Habka Finland ay si wadajir ah ugu ilaaliso amniga bulshada. Hay'adaha dowladda, shirkadaha, ururrada iyo muwaadiniintu waxay ilaaliyaan hawlaha muhiimka ah ee bulshada xaalad kasta

SUGNAANTA SAHAYDA

HUOLTOVARMUUS

Awoodda lagu hubinayo in badeecadaha, adeegyada iyo nidaamyada lagama maarmaanka u ah dadka iyo bulshada ay shaqeeyaan sidoo kale marka ay jiraan carqalado daran iyo xaalado aan caadi ahayn. Kuwaas waxaa ka mid ah, tusaale ahaan, cuntada, tamarta, gaadiidka iyo adeegyada caafimaadka

ADKAYSIGA XAALADAHA QALALAASAHA (RESILIENSSI)

KRIISINKESTÄVYYS (RESILIENSSI)

Awoodda qofka, bulsho ama bulshada guud ay u leeyihiin inay ilaashadaan awooddooda waxqabad xaaladaha adag, uga gudbaan carqaladaha oo ay dib uga soo kabtaan

HAWLAHA LAGAMA MAARMAANKA U AH BULSHADA

YHTEISKUNNAN ELINTÄRKEÄT TOIMINNOT

Hawlaha ay tahay inay shaqeeyaan xaalad kasta si ay bulshadu u sii shaqayn karto. Waxaa ka mid ah, tusaale ahaan, hoggaaminta, awoodda difaaca, amniga gudaha, sugnaanta sahayda, adeegyada dadweynaha iyo adkaysiga maskaxeed ee xaaladaha qalalaasaha

AMNIGA CYBER-KA

KYBERTURVALLISUUS

Tallaabooyinka lagu ilaaliyo nidaamyada dhijitaalka ah, xogta iyo dadka isticmaala khataraha cyber-ka. Amniga cyber-ku kuma koobna teknoolojiyadda oo keliya, balse wuxuu sidoo kale khuseeyaa dadka iyo hababka shaqada

SAAMEYN KU SAMAYNTA MACLUUMAADKA

INFORMAATIOVAIKUTTAMINEN

Hawl waxyeello leh oo macluumaadka loo adeegsado in lagu saameeyo aragtida, go'aannada ama ficillada dadka. Waxaa lagu isticmaali karaa xog been ah ama marin-habaabin ah, laakiin sidoo kale xog sax ah oo si ula kac ah loogu adeegsado ujeeddo gaar ah

MAAREYNTA SII-SOCOSHADA HAWLAHA

JATKUVUUDENHALLINTA

Habka ururku ugu diyaar-garoobo carqaladaha si hawlaha muhiimka ahi u sii socon karaan xitaa xaalad adag, isla markaana dib looga soo kaban karo xaaladdaas.

DEEGAANKA AMNIGA

TURVALLISUUSYMPÄRISTÖ

Xaaladaha, dhacdooyinka, isbeddellada iyo khataraha saameeya amniga Finland, bulshada ama dadka. Waxaa saameeya, tusaale ahaan, xaaladda caalamka, teknoolojiyadda, dhaqaalaha, deegaanka iyo qalalaasaha kala duwan

DIFAACA GUUD EE DALKA

KOKONAISMAANPUOLUSTUS

Isku-darka hawlaha milatariga iyo kuwa rayidka ah ee lagu ilaaliyo madax-bannaanida Finland, amniga muwaadiniinta iyo shaqaynta bulshada marka ay jiraan khataro kala duwan

WADA-SHAQAYN

YHTEISTOIMINTA

Hawl wadajir ah oo ay dhinacyada kala duwan ku wadaagaan xog iyo kheyraad, isla markaana si wadajir ah ugu shaqeeyaan sidii loo gaari lahaa yool isku mid ah. Amniga dhammaystiran wuxuu ku salaysan yahay wada-shaqayn noocan ah

Varautumis- ja Maanpuolustustahdistys ry MVM

Amnigu qof walba wuu khuseeyaa – nagu soo biir!

Xubin ahaan, kaliya ma aha inaad daawato waxqabadka—balse waxaad fursad u helaysaa inaad barato, ka qayb gasho oo aad la dhisto Finland ammaan badan dadka kale

Buuxi codsiga xubinimada adigoo iska baadhaya QR code-ka

Macluumaad dheeraad ah:

toimisto@mvmry.fi

www.mvmry.fi

Wargeyska Kantama waxaa lagu hirgeliyaa taageerada Maalgelinta Taageerada Difaaca Qaranka iyo Maalgelinta Naadiyada Difaaca Qaranka.

Maanpuolustuksen kannatussäätiö